**Helping Hand™** *Health Education for Patients and Families*

# Tilmaamaha Qaadida Saxarada
# Stool Collection Guidelines (Somali)

Saxarada ilmahaaga (saxaro) waa in la baaraa so loo qorsheeyo daweyntooda. Waxaad kagasoo qaadi saxarada guriga, kadibna waxaad geeysaa xarunta adeega shaybaarka ee Nationwide Children's Hospital.



**Sawirka 1** Saxarada waxaad ku keeni doontaa weel sidan oo kale sheybaarka islamarkaana ay dhantahay qiyaasta larabo.

## Waad U baahaneysaa

- Weelka saxda ah ee loogu talagalay tijaabada ayaa la dalbaday (tusaalooyinka lagu muujiyey Sawirka 1). Ma'aha in baaris walba ay isticmaalaan weel iskumid ah.
- Qalabka carrabka lagu xiro ama qasacad caag ah
- Ciyaalka waaweyn, tuunji (sawirka 2) ama bac duuban
- Calaamadee si aad u geliso weelka
- Gacmo gashiyada la tuuri karo (ikhtiyaari ah)



**Sawirka 2** Tuunji ayaa ka caawin kara aruurinta weelka saxarada cunugaaga weyn.

## Calaamadeynta

Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo calaamadda diiwaangelinta EPIC si aad ugu dhejiso weelka. Haddii kale tusaalaha ku calaamadee sidan:

- **Ka hor** inta aan la qaadan saxarada:
  - Magacyada hore iyo kan dambe ee sharciga ah ee buuxa, oo si sax ah loo higgaadiyay.
  - **Mid** kamid ah aqoonsiyada gaarka ah ee soo socda:
    - Taariikhda dhalashada **ama**
    - Lambarka Aqoonsiga Bukaanka **ama**
    - Lambarka diiwaanka caafimaadka Nationwide Children's Hospital


©2016, dib loo eegay 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii Socda…

- **Kadib** qaadida saxarada:
  - Taariiqda qaadista saxarada (MM/DD/YYYY)
  - Waqtiga qaadista saxarda (waxaa ka mid ah Subaxdii. ama Galabtii.)

## Ururinta

- Qaado Saxarada xitaa haddii uu ilmahaagu leeyahay qashin dabacsan, qashin daadanaya ama shuban.
- Dhaq gacmahaaga ka hor iyo ka dib markaad taabato ilmahaaga saxadiisa. Saxarada waxaa kujiri kara jeermisyo faafiya caabuq. Waxaad isticmaali kartaa gacmo gashiyada baaritaanka ee la tuuri karo.
- Si baaritaanku u noqdo mid saxan:
  - Waa in salka ilmahaagu aysan lahayn kareemo ama boomaatooyin. Si kastaba ha ahaatee, haddii ilamaagu leeyahay finanka xafaayada, waa caadi inaad isticmaasho saliid ama jeel (Faasiliin®), ama saliida Rasiinool®. Alaabooyinkaas wax saameyn ah kuma yeelan doonaan barista.
  - Saxarada **waa ineysan ahaan** mid a lasocoto (kaadi).
  - **Haka soo qaadin saxarada musqusha.**

| Dhallaan | Carruurta Socod baradka ah | Carruurta Waaweyn |
|---|---|---|
| Kaqaad saxarada xafaayada. Haddii ay qashinku dabacsan yahay ama uu daadanayo, dhinaca caaga ah ee xafaayadda ku dheji maqaarka agtiisa. Uga tag xafaayada sidaan muddo dheer si ay u uruuriso saxaro kufilan. | Haddii ilmahaaga socod baradka ah la baray musqusha, waxaad isticmaali kartaa tuunji nadiif ah oo qalalan, surwaalka tababarka, ama xafaayad uruurisa isla saxarada. | • Isticmaal tuunji diif ah si aad u uruuriso saxaro. Geli daboolka tuunjiga qaybta gadaale ee geesaha saxanka musqusha, gudaha kursiga musqusha.<br>• Haddii aad isticmaalayso balaastigga, si dabacsan u dhig qayb dheer oo ka mid ah cirifka baaquli suuliga oo dhan si ay bacdu ugu soo dhacdo caagaga. |

## Diyaarinta

**Kahor saxaro intaadan galin koobka saxarada, eeg bogga 4 iyo 5 si aad u ogaato qiyaasta saxda, waqtiga, iyo tilmaamo kale oo gaar ah oo kusaabsan nooca barista.**

1. Fiiri calaamadda ku qoran. Xaqiiji in ay ku qoran yihiin magaca ilmahaaga oo buuxa iyo taariikhda dhalashada, lambarka aqoonsiga bukaanka, ama lambarka diiwaanka caafimaadka. Kadib, qor taariikhda iyo waqtiga aad aruurisay saxarada. Tijaabada laguma sameyn doono haddii magacooda iyo ugu yaraan hal aqoonsi oo kale oo bukaanka ah aysan ku qorneyn calaamadda.
2. Isticmaal qalabka afka lagu xiro ama qasacad caag ah si aad ugu rid qadarka saxda ah ee saxarada weelka saamiga loogu talagalay tijaabada la dalbaday (Sawirka 3).
3. Si fiican daboolka ugu xir koobka, kadibna gali boorso laxiri karo.
4. Tuur qoriga carrabka lagu riixo ama qaadada caaga ah.
5. Keen koobka saxarada ah Xarunta Adeega Shaybaarka sida ugu dhaqsiyaha badan. Haddii aadan isla markiiba keeni karin, saxarda qaarkood waxay u baahan karaan in la qaboojiyo ama la qaboojiyo.



**Sawirka 3** Baaris walba waxey leedahay tilmaamo gaar ah. Kahor inta aadan saxaro galin koobka saxarada, eeg bogagga 4 iyo 5.

**Haddii aad aruurinayso saxarada wax ka badan hal cunug:**

- Dhaq gacmahaaga kahor intaadan saxaro kaqaadin ilmahaaga.
- Hubi calaamada koobka saxarada inuu buuxo gabi ahaanba.
- Tijaabada cunug kasta ku rid boorso gooni ah oo la xidhi karo.

## Kala-doorashada Meelaa ladhigo

- Inta lagu jiro maalinta, tijaabada ku rid:
  - Xarun Kasta Adeega Sheybaarka ama Nationwide Children's *ee udhow Guriga*™ Xarunta.
  - Sheybaarka Nationwide Children' s ee Orange wuxuu ku yaalaa wadada 555 S. 18th, Columbus, Ohio 43205.
- Inta lagu jiro habeenkii, tijaabada ku rid:
  - Waaxda Ogolaanshaha ee xarunta ugu muhiimsan ee Nationwide Children's.
- Fadlan ha keenin shaybaarka saxarada qeybta gurmadka degdega ah.
- Saacadaha shaqada iyo goobaha, ama sualaha, fadlan ka wac adeegyada sheybaarka (800) 934-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab.

# JADWALKA SAXARO ARUURINTA

| MAGACA BAARITAANKA | WEELKA ARUURINTA | SAWIRKA WEELKA | TILMAAMAHA URUURINTA | XASILOONIDA<br>*Oo ay ku jiraan gaadiidka iyo waqtiga tijaabinta |
|---|---|---|---|---|
| Fayrasyada saameeya nudaha sanka, cunaha iyo hawo mareenka ama herjabka keena (Adenovirus) 40/41 Antigiin,<br>Saxarada | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin suuf) si aad ugu yaraan ugu soo qaado ½ qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. | La qaboojiyay– 72 saacadood<br>Barafoobay– 1 bil |
| Alpha 1 Antitrypsin Quantitative, Saxaro | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin cudbi) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido koobka saxarada oo nadiif ah. | Heer kulka qolka – 24 saacadood<br>La qaboojiyay– 7 maalmood<br>Barafoobay– 3 bilood |
| Baaritaanka, saxarada | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin cudbi) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido koobka saxarada oo nadiif ah. Marka aad saxarada ka aruurinayso xafaayada, **ha aruurin** saxarada gaarta geesaha xafaayada. | Heer kulka qolka– 4 maalmood<br>La qaboojiyay– 10 maalmood<br>Barafoobay – xad la'aan |
| Bakteeriyada sababta shubanka (Clostridium difficile)<br>Hidaha sidaha Toosiin | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin cudbi) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah ama ugu yaraan ½ qaado oo saxaro jilicsan ah ama saxaro shuban ah si aad ugu rido koobka saxarada oo nadiif ah. | Heer kulka qolka – 24 saacadood<br>La qaboojiyay– 5 maalmood<br>Qaboobey-Bilo dhamaneynin |
| Dhaqanka, Saxarada | Cary Blair<br>(Koob dabool cagaaran oo dareere cas kujiro) |  | Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta koobka) ama Qoriga carabka lagu xiiro si aad ugu soo qaado saxarada. Ku shub dheecaan ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada casaanka ah.<br>Dhuuji daboolka oo kor iyo hoos u gad-gadi dhowr jeer illaa **ay isku darsamaan gabi ahaanba.** | Saxarada **waa in** la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo.<br><br>Heer kulka qolka – 24 saacadood<br>La qaboojiyay– 72 saacadood |
| | Labo qalab wax lugu baaro oo caadi ah |  | Labada cudbi ee baaritaanka ku riix xoogaa afka dabada (murqaha dabada) si aad ugu soo qaado saxaro. Ku rid suufka tuubada caaga ah.<br>Afka tuubada yar ee leh suufka **waa** inay taabtaan isbuunyada qoyan ee dhammaadka tuubada. | Heer kulka qolka – 24 saacadood<br>La qaboojiyay– 24 saacadood |
| Xaydha saxarada, Tayo leh | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin cudbi) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido koobka saxarada oo nadiif ah. | La qaboojiyay - 2 asbuuc<br>Barafoobay - 2 asbuuc |
| Baaritaanka Fayruska Caloosha (GI) | Cary Blair<br>(Weelka leh dabool cagaaran oo leh dareere cas) |  | Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta koobka) ama Qoriga carabka lagu xiiro si aad ugu soo qaado saxarada. Ku shub dheecaan ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada casaanka ah.<br>Dhuuji daboolka oo kor iyo hoos u gad-gadi dhowr jeer illaa **ay isku darsamaan gabi ahaanba.** | Saxarada **waa in** la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo.<br><br>Heer kulka qolka – 24 saacadood<br>La qaboojiyay– 72 saacadood |
| Shuban laga shakiyey/ Subanka Antigiin, Saxaro | Isku xidhka guud Gasacyada<br>ama<br>Cary Blair<br>(Koob dabool cagaaran oo dareere cas kujiro) | <br> | Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta weelka) ama qoriga carabka lagu riixo ee cusub si aad ugu soo qaado saxarada. Iskuday inaad saxarada kasoo qaado meelaha leh dhiiga ama xabka badan. Ku shub saxaro ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada midabka leh.<br><br>Weelka leh daboolka cagaarka ah wuxuu leeyahay layn casaan ah.<br>Dhuuji daboolka oo kor iyo hoos u gad-gadi dhowr jeer illaa **ay isku darsamaan gabi ahaanba.** | Saxarada **waa** in la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo.<br><br>Wadarta – guud ee kujirto weelka<br>• Heer kulka qolka– 2 bilood<br>• La qaboojiyay– 2 bilood<br><br>Koobka Cary Blair (daboolka cagaaran)<br>• La qaboojiyay – 2 asbuuc |

**Fadlan ka fiirso "Tusmada Tijaabada Shaybaarka" si aad u eegto shuruudaha qaadashada tijaabada ee aan ku qorneyn.**

# JADWALKA SAXARO ARUURINTA

| MAGACA BAARITAANKA | WEELKA ARUURINTA | SAWIRKA WEELKA | TILMAAMAHA URUURINTA | XASILOONIDA<br>*Oo ay ku jiraan gaadiidka iyo waqtiga tijaabinta |
|---|---|---|---|---|
| Baaritaanka lagu oggaado bakteeriyada (Gram Stain) (Saxarada WBC) | Labo qalab wax lugu baaro oo caadi ah |  | Labada cudbi ee baaritaanka ku riix xoogaa afka dabada (murqaha dabada) si aad ugu soo qaado saxaro. Ku rid suufka tuubada caaga ah.<br>Afka tuubada yar ee leh suufka **waa** inay taabtaan isbuunyada qoyan ee dhammaadka tuubada. | Heer kulka qolka – 24 saacadood |
| Dhiiga Saxarada, Saxarada | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qalabka afka lagu xiro ama qaado (ma aha suuf) si aad u soo ururiso ugu yaraan 1 qaado oo shaaha ah oo boodh ah si aad u geliso weelka aan nadiifka ahayn. | La qaboojiyay– 8 saacadood |
| | Kaarka baaritaanka saxarada (Hemoccult Card) |  | Sheybaarka ama bixiyaha caafimaadka ilmahaaga ayaa kusiin doona karaka Hamoccult iyo qori alwaax ah oo lagu baaro in dhiig kujiro saxarada. Isticmaal qoriga si aad saxarada uga soo qaado **2 meelood oo kala duwan.**<br>• Mari saxaro yar (oo le'eh madaxa taraqa) ee saxarada gudaha afargeeska sanduuqa A.<br>• Mari saxaro yar booska 2aad ee afargeeska B.<br>Xir daboolka kaarka. | Heer kulka qolka– 14 maalmood |
| Helicobacter pylori, Ogaashaha Antigen, Saxaro | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin suuf) si aad ugu yaraan ugu soo qaado ½ qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.<br>**Ha soo qaadin** saxarada oo kaadida isku qasan. | La qaboojiyay– 72 saacadood<br>Barafoobay – aan lahayn waqti xadidan |
| Baaritaanka Gooryaanka (O&P) | Isku xidhka guud Gasacyada |  | Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta weelka) ama qoriga carabka lagu riixo ee cusub si aad ugu soo qaado saxarada. Iskuday inaad saxarada kasoo qaado meelaha leh dhiiga ama xabka badan. Ku shub saxaro ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada midabka leh. Dhuuji daboolka oo kor iyo hoos u gad-gadi dhowr jeer illaa **ay isku darsamaan gabi ahaanba.** | Saxarada **waa in** la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo.<br><br>Heer kulka qolka - 14 saacadood La qaboojiyay - 14 maalmood |
| Baaritaanka beeryaraha Elastase (E1), Saxarada | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qalabka afka lagu xiro ama qaado (ma aha suuf) si aad u soo ururiso ugu yaraan 1 qaado oo shaaha ah oo boodh ah si aad u geliso weelka aan nadiifka ahayn.<br>**Ha soo qaadin** saxarada oo kaadida isku qasan. | **Haku** kaydin heerkulka qolka<br>La qaboojiyay –2 asbuuc<br>Barafoobay – 30 maalmood |
| pH, Saxarada | Weel nadiif ah (daboolka buluuga ah) |  | Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado ½ qaado oo saxaro jilicsan ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.<br>**Ha soo qaadin** saxarada oo kaadida isku qasan. | Barafoobay - 24 saacadood |
| Yareynta Walxaha, Saxarada | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal qoriga carabka lagu riixo ama qaado (ha isticmaalin suuf) si aad ugu yaraan ugu soo qaado ½ qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.<br>**Ha soo qaadin** saxarada oo kaadida isku qasan. | **Haku** kaydin heerkulka qolka<br>La qaboojiyay – 1 asbuuc<br>Barafoobay -2 asbuuc |
| Caabuqa sunta Rotavirus, saxarada | Weel nadiifka ah (dabool buluug ah) |  | Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro jilicsan ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.<br>**Ha soo qaadin** saxarada oo kaadida isku qasan. | La qaboojiyay- 72 saacadood<br>Barafoobay- aan muddo xadidan lahayn |